

**Dacweynta Telefishinka iyo Raadiyaha:  
Tusaale loogu talagalay daawadayaasha iyo dhageysanaya idaacadda  
[www.bsa.govt.nz](http://www.bsa.govt.nz)**

**Haddii ay jiraan arrimo uu daawadaha telefishinka ama dhageystaha raadiyaha walwal geliyey, waxaad sharciyan xaq u leedahay inaad ka dacwoto isla markaasna hubsato in dacwadaadii la tix geliyey. Dacwada uu dhageystaha iyo daawadaha ay soo gudbiyaan, waa mid habeyneysa wanaagga wargelinta.**

Tusaalahan waxaa uu ku tusayaa sida loo dacwodo iyo qaybta ay ka qaadanayaan Guddiga Habeynta Idaacadda (Broadcasting Standards Authority – BSA) in ay baaraan kana fariistaan dacwooyinka laga soo gudbiyey idaacadda.

**Maxaan ka dacwoon karaa?**

Waxaad ka dacwoon kartaa barnaamij kasta oo aad u aragto inuu ku xad gudbey xadka u dhigan warbaafinta. Barnaamij waa mid kasta oo ka soo baxa telefishinka ama raadiyaha, taasoo ku jirta barnaamijyada isku xiriirka ah. Waxaad kalood ka dacwoon kartaa xayeeysiiska siyaasadda quseeya oo la xiriira doorashada weyn.

Fadlan waxaad ogaataa in dacwada quseysa **xayeeysiiska** aad u diri karto keliya cinwaankan Advertising Standards Authority, PO Box 10675, Wellington, e-mail [asa@asa.co.nz](mailto:asa@asa.co.nz), web [www.asa.co.nz](http://www.asa.co.nz)

**Waa maxay “xadka u yaal warbaafinta idaacadda”?**

Arrimaha qaaska u ah xadka u yaal warbaafinta ee barnaamijyada raadiyaha iyo telefishinka waxay ka kooban yihiin:

- Dooq wanaagsan iyo xishood
- Sharci iyo qaanuun
- Qiyaas
- Xaqdhowr
- Goorta lagu liido
- Sax
- Arrimaha qofka u gaarka ah
- Ilaalinta ilmaha
- Dagaalka
- Xayeeysiinta qamriga
- Darajeynta barnaamijka
- War bixinta barnaamijka.

Arrimahan aan kor ku soo faahfaahiney waxay sheegayaan in xaqdhowrka xadka u yaal warbaafinta Idaacadda in ay ka mid noqdaan sharciga u yaal maamulka idaacadda taasoo aad ka heleyso **[www.bsa.govt.nz](http://www.bsa.govt.nz)**, ama in aad wacdo ama aad u qorto warqad BSA’ga.

## **Sideen dacwad u oogi karaa?**

Haddii aad dooneyso inaad ka dacwooto barnaamij ku xadgudubey xadka u yaal warbaafinta idaacadda sii deysay, marka hore u qor warqad idaacadda ay arrintani quseyso. Waxaad dacwadaada ku hagaajisaa Agaasimaha Sare. Dacwada keliya oo ka baxsan kuwa kale o aad si toos ah ugu gudbin karto BSA'ga waa midda ah ku xad gudubka arrimahaada kuu gaarka ah. Dacwadan waxaad si toos ah ugu diri kartaa maamulaha sharciyada ee BSA'ga. Waxaad u qoreysaa warqad dacwad ah adigoo isticmaalaya foomka laga helo BSA'ga websaydkooda oo ah [www.bsa.gov.nz](http://www.bsa.gov.nz), ama inaad iimeyl u dirto idaacadda arrintasi quseysa, ama warqad qoraal ah boosto ugu dirto.

## **Dacwada aad gudbineyso waa in ay sidan noqoto:**

- In ay qoraal noqoto — hadalkaadana uu ku jiro “dacwad” (formal complaint)
- In dacwadaada kaa guddoomaan idaacadda quseysa (ama BSA haddi ay tahay xadgudub shaqsiyeed) in aynan kula gudbin 20 maalmood oo ah maalmaha la shaqeeyo lagana soo billaabey waqtiga barnaamijka la sii daayey (maalmaha la shaqeeyo waxaa ka baxsan weekendiga, maalmaha fasaxyada, iyo laga billaabo maalinta fasaxa Krismiska illaa 15ka bisha Jenuwary)
- Ku dar qoraalkaada magaca barnaamijka aad ka dacwooneyso, mowjadda ama steshanka laga sii daayey barnaamijka, iyo taariiqda iyo saacadda la sii daayey barnaamijka
- Caddee arrinta barnaamijka ama xaqgudubka aad qabto in la sameeyey
- Caddee sababta aad u citiraafsan tahay in barnaamijka uu xadgudub u sameeyey.

Goortii aad qorto sababta aad u aragto in barnaamijkan uu yahay mid xadgudub sameeyey, waa caawinaad weyn haddii aad qorto tusaaleyaal arrintasi quseeysa. Bil Matalan, Caddee xarfaha aad qabto inay ahaayeen xadgudub, micnee ficillada aad u aragtey ineey ahaayeen aragti xun, ama caddee warbixinta aad u fahantay inay ahayd mid aan sinayn oo aan xaqsoor ahayn.

## **Goormaan u diri karaa dacwo BSAga?**

Sharciga Idaacadda ee 1989 waxaa uu sheegayaa in idaacadda ay kuu soo jawaabto 20 maalmood gudaheed goorta ay heleen.

Haddii aad ku faraxsaneyn jawaabta ay idaacadda kuu soo dirtay, waxaad heysataa 20 maalmood oo ah maalmaha la shaqeeyo inaad dacwadaada u gudbiso BSA si ay u sameeyaan baaritaan madaxbanaan dibna ugu noqdaan.

Haddii idaacadda ay jawaab ku siinin muddo 20 maalmood gudahood ah, waxaad heysataa muddo ilaa 60 maalmood ah oo maalmaha shaqada ah in idaacadda dacwadaada u gudbiyaan BSA.

## **Maxaa dhacaya goortaan dacwadeyda loo gudbiyey BSA?**

BSA waxaay la socodsiiyayaan idaacadda laga dacwoonayo in dacwad loo soo gudbiyey, waxay u dirayaan idaacadda koobiga dacwadaada, kana codsanayaan inay ka soo jawaabaan.

BSA waxay kuu soo diri doonaan koobi ku qoran jawaabta idaacadda. Haddii ay idaacaddu warbixin kale u soo gudbiso BSAga, waxaa lagaa codsan doonaa in warbixintaas aad jawaab ugu dambeyn ah ka bixiso.

Afar guddi oo BSAga ka socda ayaa ka fadhiisanaya dacwadaada. Waxay baarayaan dacwadaadii, ka wada hadlayaan wixii aad ka dacwootay, ka dibna go'aan ka gaarayaan haddi aad xaq leedahay iyo haddii kale.

BSAga caadiyan waxaa loo soo gudbiyaa qoraal ama ha noqoto idaacadda ama ha noqoto qofka dacwoonaya, laakiin mararka qaarkood haddii ay fursan weydo waxaa dhici karta inay sameeyaan mid wareysi is arag ah.

Go'aanka ay gaaraan BSAaga waxay u soo gudbinayaa adiga iyo idaacaddaba. Waxaa kaloo loo dirayaa isgaarsiinta iyo dadka macbiilkooda ah, waxaana lagu soo qorarayaa websaydka BSAaga.

Goorta laga xaajoonayo arrinta ku saabsan xadgudubka shaqsigu, BSAaga waxaa goor kasta ay soo dhoweeyaan qofka tabanaya in lagu xad gudbay.

Haddii BSAga ay qaabilaan dacwadaada, waxaa dhici karta:

- Iddacadda in lagu xukumo in ay daabacado caddeyn, bil Matalan in la saxo ama la soo qoro go'aanka.
- Lagu xukumo idaacadda inay bixiyaan lacag dhan \$5000 oo la siinayo Maxkamadda
- Lagu xukumo idaacadda inay bixiyaan lacag dhan \$5000 taasoo la siinayo qofka lagu xad gudbay.

Arrimaha aadka u halista ah, BSAga waxay ku xukumi karaan idaacadda in ay joojiso inay soo saaraan xayeeysiin muddo 24 saacadood ah.

Go'aanka ay gaaraan BSAga waxaa lala kori karaa Maxkamadda Sare oo lagaa qaadan karaa abiiil, dacwoodaha waa la magacaabayaa sidoo kale kuwa ka soo hor jeeda lakiin waxaa u furan inuu ka qayb qaadan dacwada socota.

## **Ciinwaanada**

Cinwaanka Maamulaha Sare ee Idaacadda aad ka dacwooneyso.

## **Telefishinka**

TVNZ  
PO Box 3819  
AUCKLAND 1141  
Telefoon: (09) 916 7000  
Fax: (09) 916 6864  
[www.tvnz.co.nz](http://www.tvnz.co.nz)

TV3 iyo C4  
TVWorks  
Private Bag 92 624  
AUCKLAND 1150  
Telefoon: (09) 377 9730  
Fax: (09) 366 5999  
Lambarka lacag la'aanta:  
0800 888 4733  
[www.tv3.co.nz](http://www.tv3.co.nz)  
[standardscommittee@mediaworks.co.nz](mailto:standardscommittee@mediaworks.co.nz)

Maori Television  
PO Box 113-017  
Newmarket  
AUCKLAND 1149  
Telefoon: (09) 539 7000  
Fax: (09) 539 7199  
[www.maoritelevision.com](http://www.maoritelevision.com)

Prime Television  
PO Box 9059  
Newmarket  
AUCKLAND 1149  
Telefoon: (09) 579 9999  
Fax: (09) 579 8355  
Lambarka lacag la'aanta ah:  
0800 759 759  
[www.primetv.co.nz](http://www.primetv.co.nz)

Sky Television  
PO Box 9059  
Newmarket  
AUCKLAND 1149  
Telefoon: (09) 579 9999  
Fax: (09) 579 8355  
Lambarka lacag la'aanta ah: 0800 759 759  
[www.skytv.co.nz](http://www.skytv.co.nz)

## **Raadiyaha**

Idaacadda raadiyaha New Zealand National ama Radio New Zealand Concert, dacwadaada waxaad u diri kartaa meeshan:

Radio New Zealand  
PO Box 123  
WELLINGTON 6140  
Telefoon: (04) 474 1999  
Fax: (04) 474 1459

Cinwaanka raadiyaha madaxbanaan waxaa dhici karta in laga heli karo ama la weydiisan karo raadiyaha arrinta quseyso:

Radio Broadcasters Assn  
PO Box 3762  
AUCKLAND 1140  
Telefoon: (09) 378 0788  
Fax: (09) 378 8180  
[www.rba.co.nz](http://www.rba.co.nz)

Haddii aad dooneyso inaad hesho idaacadaha kale waxaad ka raadsan kartaa boggan [www.bsa.govt.nz](http://www.bsa.govt.nz)

### Tixraaca dacwada

- Ma ku hagaajisay dacwadaada Maamulaha Sare ee idaacadda dacwadaada ay quseyso?
- Idaacadda miyeey iga guddoomayaan dacwadeyda 20 maalmood gudaheed goorta barnaamijka la sii daayey?
- Qoraalka dacwadaada miyaad ku dartay:
  - Magaca barnaamijka aad ka dacwooneyso?
  - Mowjadda ama stashinka uu barnaamijka ka soo baxay?
  - Taariiqda iyo waqtiga barnaamijka la sii daayey?
- Miyaad caddeysey xadgudubka ama xadgudiyada aad qabto in lagu xadgudbay, iyo sababta?
- Haddii dacwadada ay tahay midda quseysa xadgudubka **shaqsiga**, miyaad u dirtay dacwadaada BSAGA 20 maalmood gudaheed oo ah maalmaha la shaqeeyo goorta narnaamijka la sii daayey?
- Haddii aadan ku faraxsaneyn jawaabta idaacadda ay kuu soo gudbiyeen, ma u gudbisay dacwadaada BSAGA in ay baaritaan ku sameeyaan dibna ugu noqdaan 20 maalmood gudaheed goortaad jawaabta aad ka heshay idaacadda?
- Haddii idaacadda jawaab aadan ka helin 20 maalmood gudaheed, ma u gudbisay dacwadaada BSAGA si ay u baaraan dibna ugu noqdaan 60 maalmood gudaheed goorta barnaamijka aad ka dacwooneyso hawada loo sii daayey?



Broadcasting Standards Authority  
Level 2, NZ Lotteries Commission Building  
54-56 Cambridge Terrace  
PO Box 9213, Wellington 6141  
Telefoon: (04) 382 9508  
Fax: (04) 382 9543  
Lambarka lacag la'aanta ah 0800 366 996  
E-mail: [info@bsa.govt.nz](mailto:info@bsa.govt.nz)